



# Kulannada Dhegaysiga: Waxa aanu Doonaynaa inaanu Maqalno Codkaaga Ku Aaddan Shuruudaha Tallaalka COVID-19 ee La Soo Jeediyey ee Ardayda (Da'da 12+)

PPS waxa ay doonaysaa inay ku maqasho si ay u miisaanto saamaynaha ay leedahay in laga dalbado dhammaan ardayda ah da'da 12 iyo wixii ka weyn in laga tallaalo COVID-19.

Toddobaadka soo socda waxa aanu u qaban doonaa kulanno dhegaysi oo onlayn ah ardayda iyo qoysaska. Waxa lagu qaban doonaa Zoom. Kulannadu waxa weeyi:

**Salaasada, Okt. 19, 6:30-8:00 g.d.**

Waxa aanu ku casuumaynaa qoysaska PPS inay nagu soo biiraan saddex kulan oo dhegaysi oo ay xubno ka yihiin dugsiyada sare:

- **Kooxda 1:** Roosevelt, Lincoln, Ida B. Wells, Metropolitan Learning Center ([asistencia aquí](#))  
Qof kasta oo u baahan turjumaad haddii uu rabo inuu faalo bixiyo waa inuu kala qeybgalaa kooxdani. Waxaa idii diyaar ah turjubaano idii turjumaya luqadaha Isbaanishka, Fiitnaamiska, Mandariinka, Kaantaniinka, Ruush, Soomaali iyo Luqdaa Dadka Dhagoolayaasha. Si aad u hesho turjubaan Soomaali, waxaad soo wacdaa 1-914-893-5892 ka dibna wawaad galisaa furaha sirta ah oo ah 651 871 438#.
- **Kooxda 2:** Grant, McDaniel, Jefferson, barnaamijyada Multiple Pathways to Graduation ([asistencia aquí](#))
- **Kooxda 3:** Cleveland, Franklin, Benson ([asistencia aquí](#))

Waxa aanu ku dhiirigelinaynaa qoysaska dugsiyada hoose iyo dhexe, ardayda ikhtiyaarka diirad-saaridda inay doortaan koox ku salaysan dugsigooda sare ee hadda iyo/ama dugsigooda sare ee mustaqbalka.

**Khamiista, Okt. 21, 9-10:30 g.h.**

Waxa aanu ku casuumaynaa qoysaska PPS ee ku hadla luuqadda Isbaanishka inay nagu soo biiraan si ay noola wadaagaan fekradaha ay ka qabaan mawduucan. Kulankan dhegaysigu waxa uu inta badan ku bixi doonaa luuqadda Isbaanishka.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad ku soo biirto, fadlan ([ka aqbal casuumadda halkan](#)).

**Khamiista, Okt. 21, 4:30-6 g.d.**

Waxa aanu ku casuumaynaa ardaydayada PPS inay nagu soo biiraan si ay noola wadaagaan fekradahooga. Fadlan ogsoonow: Munaasabadani waa mid **ku kooban** ardayda.

Kulannada dhegaysiga waxa loogu talagalay in si toos ah laguu maqlo adiga, qoysaskayaga iyo ardaydayada. Halkan waxa ah waxa aad u baahan tahay inaad ogato:

- Marka aad aqbasho casuumadda, waxa aad heli doontaa macluumaa dheeraad ah, oo ay ku jiraan linkiga zoom ka, baratokoolada kulanka iyo “waxa ay tahay in la filo.”
- Kadib 5-daqiico oo soo dhaweyn iyo isbarasho ah oo ku aaddan munaasabadda oo ay soo jeediyaa xubnaha iyo shaqaalaha Guddida PPS, waxa aanu kugu casuumi doonaa, si gaar ah, faallo 2-daqiico ah. Waxa aanu dhiirrigelinaynaa faallooyinka diiradda saaraya sida loogu dalbayo tallaalada ardayda ah da'da 12+ sano iyo wixii ka weyn.

Haddii aanad soo xaadiri kareyn ama aad doorbidayso inaad soo gudbiso faallo qoraal ah oo ku saabsan mawduucan, waxa aan sidan ku sameyn kartaa adiga oo adeegsanaya masraxayaga adeega macmiilka, [Let's Talk](#).

Mahadsanid.